




Diiradda la saarayo: Adeegyada luqadda

Waxaad xaq u leedahay adeegyo fasiraad iyo turjumaad lacag la'aan ah.

Haddii aadan ku hadlin Ingiriisi ama aad akhriyin Ingiriisiga ama doorbidayso in aad daryeel bixiyahaaga kula hadasho luqad kale, oo ay ku jiraan luqadaha dadka aan wax maqli karin, CareOregon waxay halkan u joogtaa in ay kuu adeegto.

Halkan waxaa ku qoran tusaalooyinka qaarkood ee marka aad xaq u leedahay in aad codsado adeegyada luqadda.



Adeegyada luqadda oo lacag la'aan ah waa xuquuqdaada waana in si fudud loo heli karo.

Haddii aad wax caawimaad ah uga baahan yahay adeegyada luqadda ama aad qabto wax cabasho ah, waxaanu rabnaa in aan wax ka maqalno. Waxaad **CareOregon Customer Service** ka wacdaa **800-224-4840** ama **TTY 711**, ama farriin ammaan ah noogu soo dir careoregon.org/portal

Wax ka ogow CareOregon

Adeegyada luqadda waxaa bixiya CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid.
Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).

Health

Health Share of Oregon (HSO) waa waxa loo yaqaano daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.

health
share
Health Share of Oregon

CareOregon waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Waxaan sidoo kale gacan ka geysanaa isku duwida adeegyada luqadda ee loogu talagalay xubnaheena.

CareOregon

Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP) wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiyayaasha iyo kuwo kale.



CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- ▶ Daryeelka caafimaadka jirka
- ▶ Daryeelka caafimaadka dhimirka
- ▶ Isticmaalka mukhaadaraadka
- ▶ Daryeelka ilkaha
- ▶ Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- ▶ Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- ▶ Isku duwida daryeelka
- ▶ Farmashiyaha
- ▶ Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- ▶ Kala doorashada gaadiidka
- ▶ Adeegyada turjumaada luqadda
- ▶ ER iyo daryeelka degdega ah

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711.

careoregon.org

